

Hay'adda loo yaqaan Action on Pre-eclampsia waa sadaqad fadhigeedu yahay waddanka Boqortooyada Ingiriiska oo dhidibada loo aasay sanadkiis 1991. Waxaannu caawinaa oo taageernaa dumarka qabi jiray cudurka loo yaqaan pre-eclampsia (preeclampsia), eclampsia, HELLP Syndrome ama dhiig karka xilliga xaamilada dumarku yahay (PIH).

Hay'adda Action on Pre-eclampsia waxaa loo aasaasay gacan siinta iyo macluumaad u helista dumarka wax yeeladu kasoo gaartay cudurka loo yaqaan pre-eclampsia. Markaa kadib, maadaama aanu noqonay urur, aragtidayada iyo ujeedooyinkayagu weli waa sidoodii.

Aragtidayadu waa mustaqbalka taas oo in aanu cudurka loo yaqaan pre-eclampsia dhibaatooyin ba'an ku keenin caafimaadka iyo jiritaanka hooyooyinka iyo dhallaankooda aan weli dhalanin. Barnaamijkayagu waa in laga hortago ama la yareeyo dhibaataada ka imaanaysa cudurka loo yaqaan pre-eclampsia ayadoo loo marayo qaab ah ka warqabka dadweynaha, aqoonta xeel dheerayaasha oo la kordhiyo iyo xirfadda iyo bixinta taakulaynta joogtada ah isla markaana deg degga ah qoysaska uu aafeeyay cudurku.

Ujeedadayadu waa in la baro, lagu war geliyo isla markaana lagala taliyo dadweynaha iyo xeel dheerayaasha caafimaadka waxyaabaha ku saabsan kororka, dabeecadda iyo khatarta uu leeyahay cudurka loo yaqaane pre-eclampsia. Waxaannu olole ugu jirnaa wacyi gelin ballaadhan oo ku aadan cudurka iyo wax ka qabadkiisa si oo horumariyo qaababka loo ogaanayo iyo daaweyntiisaba. Waxaannu taageernaa dumarka uu aafeeyay cudurku iyo qoysaskooda, isla markaana hir gelinaa baadhitaan cilmiyeed in lagu sameeyo cudurka waxyaabaha keena iyo xeeladaha ku habboon ee baadhitaankiisa iyo dariiqooyinka daaweyntiisa.

Waxaannu siinaa macluumaad ku saabsan cudurka dumarka uurka leh, qoysaska waxyeeladu kasoo gaartay iyo xeel dheerayaasha caafimaadka ku lug leh daryeelka hooyooyinka. Waxaannu bixinaa waxbarasho xirfadeed ku saabsan cudurka loo yaqaan pre-eclampsia oo watta barnaamijyo is daba joog ah oo fadhiyo ah iyo maalmo barasho. Waxaannu leenahay khad taleefan qaran oo lagaa caawin karo oo ah (+208 427 4217), kooxo isku xiran oo saaxiibbo sameyso ah iyo adeegsi loo heli karayo talo bixin xirfad leh iyo daryeel.